TILMAAMAHA ARDAYGA GUULAYSTAY

Qore:

Cabdiraxmaan axmed garaad soofe

Cabdigaraad2016@gmail.com

Tell: 0634490880

الطّبعة الأولي

15/04/2017

هرجيسا

بـــســـــم اللّــه الــرّحمــن الــرّحيــم

MAHADNAQ

Waxaa mahad oo dhan iska leh Ilaahay, Allihii Islaamnimada inoo dooray, ina siiyey maskax iyo garaad wanaagsan, inoo soo dejiyey kitaabka qur'aanka ah, inoona soo diray Nebi Maxamed naxariis iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee si uu dariiqa suuban inoo tuso.

Waxaan kaloo umahad celinayaa cid kasta oo igala qayb qaadatay qorista buuggan ama faker igu kordhisay.

HORDHAC

Ardaynimadu waa fadli uu ILaahay ku galadaysto qayb kamid ah Adoomihiisa, halka kuwe kale aysan helin nasiibka ah inay wax bartaan duruufo haysta owgood sida faqri, dagaalo dheeraaday, cid waxbarta oo aysan helin, iwm ...

Hadaba qofkii nasiibkaas hela waa inuu dareensanyahay in nimco dheeraad ah uu haysto Ilaahayna uu ka doortay dadka intiisa kale.

Inta aanan gelin tilmaamaha aradayga guulaystay waxaan yara iftiimin doonaa fadliga uu leeyahay cilmigu iyo ahmiyada waxbarshada.

FALDLIGA IYO AHMIYADA WAXBARASHADA

B: Alle waxaa uu ku tilmaamay Suurada Zumar in aysan sinneyn qof wax garanaya (aqoon leh) iyo ka aan waxba aqoon (jaahil ah)

قَالَ تَعَالَىٰ:﴿ قُلْ هَلْ يَسْتَوِي ٱلَّذِينَ يَعْلَمُونَ وَٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ۗ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُوْلُواْ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴾ الزمر: ٩

T: Ilaahay waxa uu kor uqaaday sharaf iyo maamuusna siiyey dadka cilmiga lasiiyey, kor uqaadistaas waxay kulansanaysaa mid Adduun iyo mid Aakhiro labadaba, Addunka qofka cilimiga lihi wuu ka sareeyaa kaan aqoonta

lahayn, wuuna ka magac weynyahay, Aakhirana sida uu Adduunkaba uga dheereyey ugana sharaf batay ayuu ka sarayn doonaa dadka oo dhan cid lamid ah mooyaane, Janadanada meel sare ayuu ka gelayaa Allana isaga oo arinkaas tilmaamaya waxa uu yidhi:

قَالَ تَعَالَى:﴿ يَرۡفَعِ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنكُمۡ وَٱلَّذِينَ أُوتُواْ ٱلۡعِلۡمَ دَرَجَٰتٖۚ وَٱللَّهُ بِمَا تَعۡمَلُونَ خَبِيرٞ ﴾ المجادلة: ١١

Macne: Alle waxa uu kor uqaadaa kuwa rumeeyey ee idinka midka ah, iyo kuwa Cilmiga lasiiyey darajooyin Allana waa mid u xog ogaal u ah waxaad samaynaysaan.

J: Cilmiga ahmiyadiisa waxaa ku tusaya Aayadihii ugu horeeyey ee ku soo dega Nebiga (naxariis nabadgelyo dushiisa ha ahaatee) waxay amreen wax Akhrinta waana shanta Aayadood ee suurada Calaq ugu horeeya, wax akhrintuna waa qayb kamid ah qaybaha ugu muhiimsan aqoonta.

X: Cilmigu waa tilmaan ay leeyihiin Anbiyada uu Ilaahay soo diray dhamaantood waana tilmaanta ugu muhiimsan ee ay kaga soocnayeen dad kale, Qur'aankuna in badan ayuu tilmaamay arinkaas.

T: Qofkii wax barta waxay daliil utahay inuu yahay qof khayr badan Ilaahayna uu jecelyahay, Nabigu (naxariis iyo nabad gelyo dushiisa ha ahaatee) waxa uu yidhi:

(من يُرد الله به خيرا يفقّه في الدّين) رواه البخاري ومسلم

Macne: Qofkii ILaahay uu ladoono khayr Waxa uu fahansiiyaa Diinta.

J: Cilmigu waa wado ku gaadhsiinaysa gelidda Janada, Nabegu (naxariis iyo nabadgelyo dushiisha ha ahaatee) waxaa uu tilmaamay in qofkii wado qaada isaga oo cilmi raadinaya Ilaahay inuu usahlayo wadada Jananada iyo gelisteeda.

قال صلى الله عليه وسلم (مَنْ سلك طريقًا يلتمس فيه علمًا سهل الله طريقا به الى الجنة) رواه المسلم

X: Cilmigu waa dhaxalkii Nebiyada (naxariis iyo nabadgelyo dushooda ha ahaatee) qofka bartaana waxa uu nasiib uhelay

dhaxalkii Anbiyada waana fadli wayn iyo nasiib balaadhan oo qofka cilmiga bartay uu helay, nebigu (naxariis iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaatee) waxa uu yidhi:

(إن العلماء ورثة الأنبياء وإن الأنبياء لم يورثوا دينارا ولا درهما ورثوا العلم فمن أخذه أخذ بحظ وافر) رواه الترمذي وغيره

Macne: culumadu waa kuwa dhaxlay Anbiyada Anbiyadana lagama dhaxlin Dahab iyo Fiddo toona, waxaa laga dhaxlay Cilmi qofkii qaata cilimigana waxa uu qaatay dheef balaadhan.

D: Cilmigu waxaa uu ka mid yahay waxyaalaha qofka soo anfacaya waxna taraya marka uu dhinto ka kadib, gaar ahaan marka uu dad baray ama qoraalo dadka wax tar uleh uu ka tago Nebigeenu (naxariis iyo nabadgelyo dushooda ha ahaatee) waxaa uu yidhi:

(إذا مات الإنسان، انقطع عمله إلا من ثلاث، صدقة جارية أوعلم ينتفع به، أو ولد صالح يدعو له) رواه مسلم وغيره

Macne: Qofku marka uu dhinto wuu go'ayaa camalkiisu saddex arimood mooyaane, sadaqo soconaysa oo uu la baxay, Cilmi lagu intifaaco oo dad baray, ama Ilmo wanaagsan oo usoo duceeye.

R: Qofka cilmiga bartay dadkana gaadhsiinaya waxaa uduceeya wax kasta oo ku sugun Adduunka, nabiguna (naxariis iyi nabad gelyo dushiisa ha ahaatee) waxa uu yidhi:

(إن الله وملائكته وأهل السموات والأرضين حتى النملة في حجرها وحتى الحوت ليصلون على معلم الناس الخير) رواه الترمذي وغيره.

Macne: Alle iyo malaa'iktiisa cidda samada ku sugan iyo dhulkaba xitaa Quraanjada godkeeda ku jirta iyo kalluunkuba waxay uduceeyaan qofka dadka khayrka baraya.

S: Cilmigu waa nuur uu qofku ifsanayo uuna kuu garanayo xuquuqda uu Ilaahay ku leeyahay iyo ta Adoomaha Ilaahay ku leeyihiin.

SH: Cilmigu waxaa uu dhisaa korna uqaadaa dadka sharaftooda Jahliguna waa uu dumiyaa hoosna wuu udhigaa. Meeriskii (bayd) carabiga ahaana waa kii odhanayey:

العلم يبني بيوتا لا عماد بها** والجهل يهدم بيت العزّ والشّرف

Macne: Cilmugu waxa uu dhisaa guryo bilaa tiirar ah Jahliguna waxa uu dumiyaa guri lahaa ciso iyo sharaf.

DH: cilmiga waxa laga helayaa oo uu kulansanayaa labada khayr ee Adduun iyo Aakhiraba Imaamu shaafici waxa laga wariyay in uu yidhi: qofkii Adduun doonayaa cilmiga ha barto qofkii Aakhiro doonayaana cilmiga ha barto.

C: qofka cilmiga leh waa dahab soconaya cid ka nasiib fiicanna ma jirto xitaa haddii ay dhaleen aabo iyo hooyo liita, wax saamayn ah kuma yeelanayaan ninkii carabiga ku gabyey waa kii lahaa:

رأيتُ العلمَ صاحبَه كريما ... ولو ولدَتْه آباءٌ لئامُ

Macne: waxaan arkay in cilimiga saaxibkii wanaagsan yahay haba dhaleen aabo iyo hooyo liitaa.

Cilmiga ahmiyadiisa wax lasoo koobi karo maaha inbadan ayeyna diinteenu ka hadashay oo qaadaadhigtay fadligiisa.

DR Raaqib Al-Sarajaani waxa uu tilmaamay kelmada cilmi iyo meelaha laga soo dhanbashay inay quraanka ku soo aroortay **779** jeer Kitaabka Saxiixul Bukhaarinaga **300** oo jeer.

Cilmigu waa waxa ay umadi ku horu marto sharafna ku gaadho, waxaana sharaf ugu filan Cilmiga in marka qofka aan cilmi lahayn loo tiiriyo uu ku farxo, Jahligana waxa fool xumo ugu filan qofka jaahilka ah marka lagu tilmaamo jahilnimo in uu ka cadhooodo.

Hadaba Ardayda fursadda wax barasho heshay iskuma jiraan qaar ayaa ku guulaysatay ujeedkoodii wax barasho, halka ay kuwo kale ku fashilmeen.

Waxaan buuggan si kooban ugu tilmaami doonaa kuwa ugu muhiimsan tilmaamaha uu ku suntanyahay Ardayga guulaystay.

TILMAAMAHA ARDAYGA GUULUYSTAY

1: Daacadnimo (IKhlaas) waa Arday wax ubaranaya inuu naftiisa ka saaro mugdiga Jahliga gaadhsiiyana iftiinka Cilmiga rajaynaya inuu Aakhiro ku badbaado cilmiga Alle baray Jannadana ku galo.

Intaas kabacdina doonaya inuu ku anfaco cilmiga uu baranayo dadkiisa iyo dhamaan muslimiinta.

Barshada cilmiguna ka ma aha inuu gaadho dadka amaantooda iyo in uu ku faano dadkana isugu kibriyo qofka saas wax bartaana kuma liibaano, cilmigiisuna wax tar mayeesho.
2: waa Arday waqtigiisa qorsheeya oo dareesan qiimaha waxqtigu uu leeyahay jadwal usameeya noloshiisa iyo hadafkiisa wax barasho, iswaydiiya bishan maxaad gaadhay? lixdan bilood maxaad qabatay? Sanadkii tagay maxaa kuu kordhay?

Waqtigu waa wax qaali ah, waana lafdhabarta nolasha, Adduunka dadka meel gaadhay oo dhami waa dadkii waqtigooda ka faa'idaystay dadka hadhay ee aan waxba ka qabsan adduunkana waa dadkii dayacay waqtigooda.

Dadka Janada galay Aakhiro waa dadkii waqtigooda ka faa'idaystay Eebe waxa uu yidhi:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿ كُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟ هَنِيٓـًٔۢا بِمَآ أَسْلَفْتُمْ فِى ٱلْأَيَّامِ ٱلْخَالِيَةِ ﴾ الحاقة: ٢٤

Macne: cuna oo cabba mid bogaadin leh waxaad soo hor marsateen aayaamihii tagay sababteed.

Dadka hungoobay ee khasaaray Naartana galay maalinta Aakhiro waa kuwii aan ka faa'idaysan waqtigoodii Adduunka ay ku heleen Eebana waxaa uu yidhi arinkaas isaga oo tilmaamaya:

قَالَ تَعَالَىٰ: ﴿ ذَٰلِكُم بِمَا كُنتُمْ تَفْرَحُونَ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ وَبِمَا كُنتُمْ تَمْرَحُونَ ﴿٧٥﴾ ﴾ غافر: ٧٥

Macne: kaasi waa wixii aad ahaydeen kuwo farxa Arlada dusheeda xaq la’aan iyo waxaad ahaydeen kuwo ciyaara.

Ufiirso labada qolo kuwa hore waxaa lagu tilmaamay inay Adduunka soo shaqaysteen waqtigiina ka faa’idaysteen, kuwa kalana waxaa lagu tilmaamay in ay iska dayaceen waqtigii weliba ay ciyaar iyo qosal ku dayaceen.

Alle in badan ayuu ku dhaartay qaybo waqtiga kamid ah sida casarka, Fajriga, Habeenka iyo Maalinta, waxayna ku tusaysaa dhaartaasi muhimadda waqtigu uu leeyahay, Allana kuma dhaarta shay muhimad wayn leh mooyaane.

Ibnu qayim waxaa uu yidhi: waqtiga oo ladayaco waxay ka darantahay geerida."إضاعة الوقت أشد من الموت"

Cabdilaahi Ibnu Mascuud waxa uu yidhi: umaan murugoon shay saan uga marugooday maalin ay dhacday qoraxdeedii cimrigaygii nuqsaamay cilmina uusan ii siyaadin.

Xassan Al-basri waxaa uu yidhi: Ina Adanoow waxaad tahay ayaamo, haddii ay maalin tagtana qayb kaa mid ah ayaa tagtay.

Taabici lo odhanjiray Caamir Ibnu Cabdulqays ayaa maalin nini ka soo hor baxay, markaas ayuu ku yidhi ilahadal waxa uuna ugu jawaabay: **Qorraxda jooji aan kula hadlee**.

Dadkii hore gaar ahaan kuwoodii wax baran jiray wax kasta wuu kala qaalisanaa waqtigu, saacadaha ay wax cunayaan iyo kuwa ay xaajo gudanayaan ayey dhibsan jireen waqtiga kaga lumaya, marka ay wadooyinka marayaan ayey ka faa’idaysan jireen waqtiga oo ay cilmiga akhrin jireen.

Shiikhii la odhan jiray Saclab Al-naxawi isaga oo toddobaatan jir ah oo wado maraya cilmina akhrinaya ayuu god ku dhacay halkaas ayuuna ku geeriyooday.

Abuu Barakaat shiikhii la odhan jiray oo Awow uhaa Ibnu Taymiya waxaa laga weriyaa xilliga uu xaajo gudanayo inuu qof inta uu kitaab udhiibo uu adhan jiray kor u akhri si aan umaqlo.

Dahabi markii uu ka waramayey shiikh KHaddiib waxa uu ku sifeeyey waxa uu soconjiray isaga oo gacanta kuwata kitaab uu mudaalacaysanayo.

Akhristoo lama soo koobi karo qisooyinka tilmaamaya culumadeenii hore say ugu faa'idaysan jireen waqtiga waxaad ku arkaysaa wax layaab leh markad aad taariikhdooda akhriso.

Isku day inaad ku dayato dadkaa wanaagsan in lagu daydaana waa shafar iyo guul, watigaaguna yuusan ciyaar kaaga lumin iska ilaali waxyaaha waqtiga lumiya.

- **Waxyaalaha waqtiga dayaca.**

1: Inaadan dareensaynayn ahmiyada waqtiga iyo fadliga uu leeyahay.

2: Hawada naftaada oo aad raacdo, naftuna waxay jeceshahay raaxada iyo inaadan mashquulin.

3: inaad waxaad hadda qaban lahayd dib udhigto oo ad dhahdo beri Ayaan qabanayaa ama bisha danbe iwm.

4: Inaad leedahay saaxiibbo xun xun oo waqtiga kaa lumiya, aadna kala sheekaysato wax aan waxba ku tarihin.

5: caajiska iyo inaad ka wahsato cilmiga akhrintiisa iyo xifdigiisaba.

6: internaydka oo lagu mashquule gaar ahaan faceboogga whatis'upka iyo waxyaalaha lamidka ah, weliba hadda waa waxyaalaha ugu badan ee waqtiga ka qaada da'yarta.

7: dhagaysiga waxyaalo aan banaanaay, ama aan faa'ido lahayn sida heesaha nashiidooyinka iwm.

Arday iska ilaali waxyaalahaas si aad hadafkaaga ugaadho cilmigaana heer uga gaadhid.

Waxyaalaha kuugu kaalmayn kara inaad ka faa'idaysato waqtiga.

- Alle oo lagu xidhnaado lana raaligeliyo.
- Ahmiyada waqtiga oo ladareensanaaado.
- In mar walba lasamaysto jadwal kuu qorshaynaya waqtigaaga iyo waxyaalaha aad qabanaysid.
- In layska ilaaliyo saaxiibbada xunxun ee cilimga kaa mashquulinaya.
- Cuntada oo aan labadsan, cuntada badanna waxay keentaa hurdo badan iyo caajis.
- Saaxiibo fiican oo lasamaysto kuuna noqda kuwo aad higsato kuna dayato dadaalkooda iyo aqoontaada.

Imaamu Xaramayn waxaa uu yidhi: Ardaygu wuxuu seexdaa cunaana marka ay ku khasabto dantu uun.

Imaamu Nawawi waxaa uu cuni jiray halmar habeenkii iyo maalintii sida dad badan ka sheegeen.

3: waxaa kamid ah tilmaamaha ardayga guulaystay, waa Arday ixtiraama qadariya maamuusa macalinkiisa, macluumaadka uu sheegayana u dheg raariciya si aadaab iyo xushmana leh ula dhaqma.

Ogow arday macalinku waa waalidkaa kula jecel horumarka iyo inaad meel sare gaadho, waxa uu udhididaa usoo jeeda una kalahaa siduu aqoonta kuu gaadhsiin lahaa, mana mutaysto inaad xaqqiisa ka gaabisid, dadkiii hore waxay odham jireen qofkaan xaraf ka faa'ido Addoon Ayaan unoqonayaa.

Shiikh Rabiic la odhanjiray waxaa laga soo weriyaa inuu yidhi: ku maan dhiiran inaan biyo cabbo Imaamu shaafici oo isoo eegaya.

Ardaydii hore ee taqaanay xaqqa macalinkoooda waxay ka ilaalinjireen macalinkooda sanqadha waraaqaha, buugta iyo kutubta ay sitaan markaas ayey kitaabkooda ama buugaagtooda qoryo yar yar dhexada ka soo gelin jireen si aysan usanqadhin marka ay hadhow bog kale ugudbayaan oo ay soo rogayaan.

Waxa ayna ardaydu ku celcelinjireen oo qaadi jireen baydkii carabiga ee odhanayey:

قُم للمعلم وَفِه تَبجِيلاً ** كَاد المُعلم أن يكون رسولاً

Macne: u isitaag macallinka, ilaali adiga oo waynaynaya waxaa uu ku dhowaaday macallinku in uu Rasuul noqdee.

Laakiin hadda xaaladdu way is bedeshay macalinku waxa uu kamid noqday dadka loogu ixtiraamka daranyahay marar baddanna naftiisaba uma ammaan helo.

❖ Qaabka aad macalinkaaga u maamuusi karto:

- ✓ Casharka si wacan ugu dhagayso kana xanbaar aqoontiisa.
- ✓ Iska ilaali inaad ku hadasho ama sheekayso isaga oo darsiga jeedinaya.
- ✓ Iska ilaali inaad moobeel ama wax kale ku mashquusho macalinkaaga oo darsigii wada.

- ✓ Iska ilaali inaad dhinacyada daymooto ama fiir fiiriso marka casharku socdo fiiri macalinkaaga iyo buuggaaga una dheg raaraaci sharaxa macalinkaaga.
- ✓ Wixii waajibaad ah ama shaqo guri ah sidii laguugu diray usoo gudo.
- ✓ Soo qayb, soona muraajacee casharka laguu dhigay marka macalinku su'aal uu ardayda waydiiyana isku day in aad farta taagto oo aad ka jawaabto macalinka waxaa farxad gelinaysa ardaydii oo casharkii fahamtay su'aalahana ka jawaabaysa.
- ✓ Uducee macalinkaaga marka uu kula joogo, iyo marka aad ka maqantahayba.

4: Waa Arday Alle ka cabsada, cibaadaysta, akhlaaq fiican leh, socodkiisa iyo hadalkiisaba ay aqoontu ka muuqato kuna dheehantahay, masaajidda ku xidhan, salaadana jamaacada ku ooga, fartooma Awaamirta Alle iyo ta Rasuulka (naxariis iyo nabadgelyo dushiisa ha ahatee).

5: Waa Arday xumaha iyo danbiyaga ka fogaada, Ardayguna haddii uu xumo iyo denbiyo sameeyo dhibaato weyn ayuu kala kulmaa oo sababi karta inuu waxbarashada sii wadi kari waayo, maskaxda ama qalbiga qofku waa muraayad mar kasta oo uu danbi sameeyana dhibic madow ayaa isku qorta, haddii uu ka toobadkeeno waa laga tir tiraa haddi uu mid kale sameeyana mid labaad ayaa lagu qoraa, saas ayaa lagu wadaa ilaa qalbigu wada madoobaado, Qalbi madoobaaday oo wasakhoobayna wax ma qaybi karo mana fahmi karo.

Ogow Ardayoow markasta oo xumahaaga iyo denbigaagu bato fahankaaguna wuu yaraanayaa, markasta oo aad Alle ku xidhnaato aadna dhowrsoontahayn Ilaahay fahan dheeraad ah ayuu kuu furayaa.

Nin la odhan jiray Cali ibnu KHashram ayaa shiikhii la odhanjiray Wakiic Ibnu Jarraax oo ahaa shiikh aad uxifdi badnaa waydiiyey, waxaad xifdidaa intaan xifdinno in ka badan ee maxay ku dhacday? Markaas ayuu inta uu si hoos ah ula hadlay ayuu ku yidhi Caliyow hadddaan kuu sheego dawada loo cuno Ilowga masamaynaysaaa? Markaas ayuu yidhi haa Ilaahay Ayaan ku dhaartaye, markaas ayuu Wakiic ku yidhi: waa macaasida oo laga tago ilahay Ayaan ku dhaartaye maan arag wax uga anfac badan xifdiga macaasida oo laga tago.

Imaamkii waynaa ee SHaafici ayaa iska dareemay fahan xumo, markaas ayuu shiikhiisii Wakiic ibnu Jarraax usheegay, shiikh Wakiic talo dhaxal gal ah ayuu siiyey oo ahayd:- iska ilaali maacaasida Cilmigu waa nuur, nuurka Allena lama siiyo qof Alle caasinaya, imaamu shaaficina waa kii lahaa isaga oo intaa gabay u bedelaya:

شكَوْتُ الى وكِيع سُوء حفظي ** فأرشدني الى ترك المعاصي
وأخبـرنــي بـأنّ الـعـلم نـور** ونـور اللــه لا يـُهدي لـعاص

6: waa Arday macalinkiisa la leh xidhidh xeel dheer oo ka faa'ideysta waqtiga xiisadda iyo xiliyada kaleba, waxyaalaha soo wajaha iyo caqabadaha uu la kulmona kala tashada, gaar ahaan xagga waxbarashada.

Macalinka iyo ardaygu maaha dad aan wax dhigis mooyaane wax kale ka dhaxayn, macalinku waa waalid la rabo in uu xanaaneeyo ardaydiisa, raganamdiisana isugu geeyo sidii arday aqoon leh uu usoo saari lahaa, ardayguna waa wiilkii macalinka waxaana lagarabaa inuu qaato talada macalinkiisa, waxyaalaha cilmigu uusan ka maarmin waxaa kamid ah ardaygu inuu macalinkiisa odhowyahay si gaar ahna ula xidhiidho wax kasta oo uu ubaahdana uu waydiin karo.

7: waa Arday u dulqaata dhibka wax barashada iyo adaygeeda culumadu waxay odhan jireen:-

(لا ينال العلم براحة الجسد)

Macne: laguma gaadho cilmiga jidhka oo loo raaxeeyo.

Taariikhda dadkii wax bartay mar aad akhrido waxaad arkaysaa arimo adag oo ay uu soo mareen barashada cilmiga, sida safaro dhaadheer – oo ay weliba cagahooda ku soconayeen – gaajo, iyo haraad, ilaa qaarkood ay kaadidooda cabbeen marar badan halka qaar kale ay dhiig kaajeen.

Cilimgu waa shay sare waxa sarana laguma gaadho si fudud ee waxa loo maraa adayg iyo dhibaato imaamu shaafici wuxuu yidhi:

Lama haleelo cilmiga iyada oo duliga lagu sabro mooyaane

(لا يدرك العلم إلا بالصبر على الذل)

Cabdilahi ibnu Cabbaasna waxaa laga weriyey inuu yidhi isaga oo kal hadlayey cilmiga: waan dulloobay markaan dalbayey waana cisoobay markii ani layga dalbay

(ذللت طالبا وعززت مطلوبا)

Ninkii carbiga ku gabyeyna waa kii yidhi:

ومن لم يذقْ مُرَّ التعلم ساعةً .... تجرَّعَ ذلَّ الجهلِ طولَ حياتهِ

Macne: qofka aan dhadhamin qadhaadhka waxbarashada saacad, wuxuu qudhqudhiyaa duliga jahliga nolashiisa oo dhan.

8: waa arday wax akhriya oo aan ku eekaan casharka uu soo dhigtay iyo muqararkiisa keliya, gaar ahaan takhasuskiisa buugaag badan ka Akhriya.

Cilmugu waa akhris inta macalinka aad ka baranayso waa fure uun, adi ayaa lagaa rabaa inaad sii raad raacdo oo waxbadan akhrido.

9: waa Arday hansare sare leh, aaminsan inuu wax ku soo kordhin karo Adduunka, dadkiisana wax uqaban karo.

Ogow Ardayoow waxaa adiga kugu xidhan umaddaada mastaqbalkeeda haddii aad noqoto mid aqoon leh oo waxa qaban kara dadkaagu mastqabal fiican ayey leeyhiin, laakiin haddaad lamid noqoto qofka jaahilka ah una fekerto siddiisa dadkaagii adaa la hadhay ee is ogow.

Marka umad mustaqbalkeeda iyo meesha ay ku danbaynayso la rabo in la ogaado waxaa lafiiriyaa dadka usoo ka caya waxa ay yihiin iyo sida ay u noolyihiin hadday noqdaan kuwo wanaagsan, umadaas mustaqbal fiican ayey yeelataa, hadday yihiin kuwo habeen ah oo aan waxba kala ogayna umaddaas mastaqbalkeedu mugdi ayuu madaxa geliyaa.

10: waa Arday dadaal badan casharka si wacan udhagaysta marka uu macalinku jeedinayo, hadhowna soo muraajaceeya wixii shaqo guri ahna kasoo sheqeeya.

Arday walbaana ardayga uu ka dadaal badnaa xilligii wax barashada beri wuu ka darajo sarayn doonaa, kana aqoon badnaan doonaa.

Baydkii carabiga ahaa waa kii odhanayey:

بقَدر الكِد تُكتسب المَعالي ** ومَن طَلب العُلى سَهَر اللّيالي

Macne: sida loo kala dadaal badan yahay ayaa loo kala kasbadaa saraynta, qofkii meel sare doonayaana habeenkii ayuu soo jeedaa.

11: waa Arday dhaqan geliya oo aan dayacin talooyinka muhiimka ah, kuna qora baal dahab ah iyo buuggiisa ugu muhiimsan, ama ku qorta waraaq ay kuna dhejiya gidaarka si uu mar kasta oo ishiisu qabato uu uxasuusto.

Imaamu Bukhaari oo qoray kitaabka la dhaho Saxiixul Bukhaari oo ah kitaabka ugu wayn kutubta ay muslimiintu qoreen, noqnayana kitaabka labaad ee aynu haysano, waxaa

keliya oo ka horeeya musxafka qur'aanka ah, waana kitaab lagu uruuriyey Axaadiistii Nebigeena (naxriis iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaate) intii saxiixa ahayd, waxaa ku kalifay qoraalka kitaabkaas Imaamu Bukhaari waxa uu ka maqlay shiikhiisii lo odhanjiray Isxaaq ibnu Raahawayh oo ardayda ku leh: haddaad uruurin lahaydeen kitaab kooban oo ku saabsan inta saxiixa ah sunada Nebiga way fiicnaan lahayd.

Imaamu Bukhaari ardaydaas ayuu ka mid ahaa hadalkaasna qalibigiisa ayuu meel kaga dhacay saas ayuuna ku go'aansaday in uu arinkaas isu taago wuuna ku guulaystay.

12: Waa Arday joogteeya waxbarashada mar walbana heerkiisa waxbarsho kor uqaada, dariiq kasta oo uu cilmi ku korodhsanayana ka faa'idaysta geed dheer iyo mid gaabanba ukora cilmiga awgii.

13: Waa Arday fadhiista boosaska hore ee fasalka, oo aan xagga danbe ismarin si uu waxyaalo kale ugu mashquulo dib is marintuna waa caadada ardayga caajislowga ah lagu garto.

14: Waa Arday firfircoon oo kaqayb qaata dhamaan howl qabadyada madarasadiisa ka jira sida aqoon is waydaarsiyada, nadaafadda dugsiga, iwm.

15: Waa Arday ixtiraama dhamaan dadka iyo bulshadiisa hadaladiisa iyo ficilkiisaba ay ka muuqato aqoontu.

Waxaa ladhahaa:-

(الإحترام لايدل على الحب وإنما يدل بحسن التربية)

Macne: inaad cid ixtiraamto ku tusi mayso jacayl aad jeceshahay cidda aad ixtiraamtay laakiin waxay ku tusaysaa tarbiyad waanaag.

Cilmi aan Aadaab lahayn waa geed aan midho lahayn oo kale, ama dab bilaa xaabo ah.

16: Waa Arday nadaafadda ku dadaala jidhkiisa iyo dharkiisuba nadiif yihiin, soo cadayda cidiyahana iska gura.

17: Waa Arday aan ujarjarin dugsiga iyo goobaha waxbarashada, waqti horena yimaada habsankana ka taxadara.

18: waa Arday ducaysta, Allana ka barya inuu cilmiga u sahlo, Nebiga (naxariis iyo nabadgelyo dushiisha ha ahaatee) waxaa ka sugnaatay inuu ku ducaysanjiray:

(اللهمّ إني أسألك علمًا نافعًا ورزقًا حسنًا)

Macne: Allow waxaan ku waydiistay cilmi naafic ah (waxtar leh) iyo risqi wanaagsan.

Maxay ku latahay Nebiga oo Alle doortay hadana saas ku ducaysanaya ardayoow miyaadan adigu ka mudnayn inaad ducadaas iyo kuwo kaleba ku celceliso in badan?

19: waa Arday aan hilmaamin waalidkii adduunka sabab ugu ahaa in uu yimaado waxna soo baray iyo dhammaan cid kasta oo waxbarashadiisa ka qayb qaadatay, wuu uduceeya waalidkiis iyo dhamaan macalimiintii cilmiga bartay.

20: waa Arday faa'idada cilmiga ah aan uga tagin xishood iyo kibir toonna, kana qaata cilmiga qof ka sareeya mid ka hooseeya iyo mid ay isku heer joogaan saddexdaba.

Xishoodku waa wax fiican laakiin haduu kaa hor istaago cilmiga sax maaha kibirkuna mar walba waa wax xun isagu, ardayguna haddii labadaas ay ku dhacaan waxba ma barto ninkii carabiga ku gabyey waa kii yidhi:

العلم حرب للفتى المتعالي.....كالسيل حرب للمكان العالي .

Macne: cilmigu dagaal ayuu kula jiraa wiilka is kibriya waa daadka oo kale oo dagaal kula jira makaanka sareeya.

21: waa arday xifdiya cilimga oo maskaxda ku haya waxa uu soo dhigtay, cilmiga iyo xifdiguna Makala maarmaan, gaar ahaan meelaha muhiimka ah ee waxyaalo badan ku dhisanyihiin iyo qawaacidda caamka ah.

Cilmigu waxa uu u bahaanyahay dadaal aan kal go' lahayn oo dhinac walba ah, dadkii hore saan soo tilaamaannay dhib kasta way u mareen cilmiga barashadiisa qaar ayaan guursan oo adduunka ka tagay iyaga oo doobab ah, waxaan kamid ah raggaas imaamu Nawaawi, inbnu taymiya iyo rag kaleba, cilmiga ayeyna ka jeclaayeen dumarka.

Shiikha la dhaho maxamuud Al-samakhshari waxaa kamid ah gabaygiisii:

سهري بتنقيح العلوم ألذّ لي*** من وصل غانيّة وطيب عناق

Macne: soo jeedka aan ku soo jeedo cilmiga kala hufkiisa ayaa iiga macaan inaan gaadho gabadh ii heesta ama aan cadar qoor qooraysto.

Dadkii aqoonta cilmiga lagu yaqaanay say cilmiga u akhrinayaan una xifdinayaan ayey hurdada kala dheeraan jireen qaarkood ayaa laga weriyaa inaysan labo sano dhinacooda dhulka dhigin halka qaarkood ay ku indho beeleen.

Imaamu Nawaawi ayaa la waydiiyey sidee u seexataa? Markaas ayuu yidhi: marka ay hurdadu iga xoog badato Ayaan kutubtayda cuskadaa cabbaar markaas Ayaan markiiba soo baraarugaa.

Xitaa hadday seexdaan hurdo waxay la soo kici jireen welwel imaamu bukhaari waxaa laga weriyaa habeenkii labaatan jeer in uu ka soo kici jiray hurdada oo marba faynuuskiisa daaran jiray.

Qiso ayaa jirta laga sheego Imaamu shaafici oo odhanaysa: habeen ayuu marti unoqday imaam Axmed inbu Xanbal oo

ardayda Imaamu shaafici ka mid ahaa, gabadh uu dhalay Axmed Ibnu Xambal ayaa habeenkii oo dhan soo jeeday oo islahayd bal ogow Imaamu shaafici waxaa uu caawa sameeyo, waxayna rabtay inay qaab nololeedkiisa wax ka ogaato, si ay ugu dayato, una hesho sababta ay dadka oo dhami u hadal hayaan, Aabaheed Axmed iyo dadka kaleba waxay ka maqli jirtay iyaga oo leh: Imaamu shaafici ayaa saa yidhi! Gabdhaasi habeenkii may seexan waxayna u fiirsanaysay waxa uu sameeyo Imaamu shaafici, subaxii ayay Aabaheed u timi oo ku tiri Aabow ninkan saddex wax oo layaab leh Ayaan ku arkay, markaas ayuu yidhi maxay yihiin, waxay tiri:

1: xalay cuntadii muu soo hanbayn oo wuu laastay, dabcan dadkii hore saas dhaqan uma ahayn, qofka martida ahna cuntada qayb ayuu soo hanbayn jiray si loo garto in uu dhergay, qofka martida ahna hadduu cuntada laasto ceeb ayay ku ahaan jirtay cidda marti loo yahay sababta oo ah waxaa laga dheehan jiray in uusan qofkaasi dhergin.

2: xalay wax Salaatu layl ah muu tukan, dadkii wanaagsanaa ee horena kamay tagi jirin inay habeenkii cibaadaystaan.

3: saaka Salaadii subax uma uusan waysaysan siduu iskaga hurday ayuu kacay horayna ka galay Salaaddii subax.

Axmed ibnu xanbal ayaa inta uu soo aaday xagii Imaamu shaafici waydiiyey saddexdan arimood.

Waxa uu kaga jawaabay Imaamu shaafici sida tan:

1: tan ugu haraysa, cuntada aan laastay waa tii Axmed ibnu Xanbal, mid ka xalaalsanna mo ogi sidaa awgeed waan ka zaad iyo sahay qaadanyey cuntadaas xalaasha ah.

2: tan labaad xalay oo dhan waxa aan ka fekerayey oo ku soo jeeday daraasaynta Xadiis kamid ah Axaadiistii Nebiga oo aan faa'idooyin iyo fiqi kala dhex baxayey waqtina umaan

helin Salaatu layl, cilmiga ayaana ka fadli badan salaadda sunnaha ah.

3: tan saddexaad xalayba maan seexan oo waysadii cishe ayaan Salaaddii subax ku tukaday.

Qisadani waxay ku tusaysaa sida dadkii cilmiga meesha sare ka gaadhay ay ugu soo jeedi jireen.

Ninkii Ameerikaanka ahaa ee la odhanjiray Toomaas Alfa Adiisoon (Thomas Alva Edison) oo ahaa nin waxyaalo badan oo muhiimad ah Aadamaha u hindisay, sida guluubyada ama laanbadaha laydhka, Aaladaha laysku sawiro, iyo waxyaalo kale waxaa la yidhaahaa markii uu rabay inuu guluubkii ugu horeeyey hindiso waxa uu ku fashilmay **999** jeer markii **1000** ayuuu ku guulaystay.

Arinkan waxa uu ku tusayaa inaad aqoonta xoglo laaban lagu gaadhin oo ay u bahaantahay dadaal iyo sabir.

❖ **Waxyaalaha kuugu kaalmaynaya inaad xifdido cilmiga.**

- Alle ka cabsiga iyo qofka oo qalbigiisa ka dhowra danbiyada.
- inaad wax xifdido waqtiyada ku haboon waqtiyadu waa kula fiicanyihiin xifdiga oo isku mid ma aha waxa kamid ah waqtiyada xifdiga ku wanaagsan kuwan:
- ✓ Habeenkii gaar ahaan wixii cishaha ka danbeeya iyo qaybta ugu danbaysa habeenka.
- ✓ Salaada subax ka dib.
- ✓ Waqtiga aadan dheregsanayn colooshaaduna ay madhantahay.

- inaad doorato boos ku habboon xifdiga iyo wax akhriska, goobuhuna way ukala fiicanyihiin xifdiga waxaana kamid ah bosaska xifidiga uwanaagsan
- Masaajidda Alle iyo goobaha barakaysan.
- Meelaha sanqadhu ku yartahay ee wax ku mashquulinayaa aysan jirin.
- In uu ardaygu doorto in ku habboon xifdiga, wax uusan owaadi karinna isi saarin, fadhi walbana waa inuu in ku manaasib ah xifdiyo, shayga uu xifdinayana waa inuu kala qaybiyo oo marba in yar xifdiyo.
- Waa in ardaygu hal buug ka xifdiyo casharkiisa, tusaale marka aad kitaabka Arbaciin qaybayso waa inaad dabcad keliya ka qaybto haddaad dhowr Arbaciin marba mid ka arkhiso siwacan uma qaban doonto maskaxdu.
- Waa inaad iska saxdaa waxaad qaybayso qoraal ahaan iyo macne ahaanba si aadan wax qaldan uqaybin.
- Waa inaad caado uga dhigtaa naftaada xifdiga, kuna rabaysaa inay wax xifdido, markaa aad baryo ku waddo wax xifdinta marka danbe iyada ayaa jeclaan doonta inay wax qaybto.
- inaad ku camal fasho kuna dhaqanto casharka aad xifdiday

❖ **Wax yaalaha lagu daweeyo haddaad caajis ama daal dareento adoo wax xifdinaya.**

- In aad bedesho qaabkaad ahayd markaad wax xifdiyeysay, haddaad fadhiday inaad istaagto banaanka yara soc socoto.

- Inaad wax soo jiidanaya maskaxda sida qisooyinka cabaar yara akhrido.

Iska ilaali ardayoow haddii aad caajis dareento inaad markiiba adeecdo naftaada oo aad joojiso akhrinta iyo xifdiga.

22: waxaa kamid ah tilmaamaha ardayga guulaystay, in uu yahay Arday dadka kale gaadhsiiya waxa uu bartay cilimiguna gaadhsiinta ayuu ku kordhaa kuna barakooobaa ninkii carabiga ku gabyey waa kii lahaa:

يزيد بكثرة الإنفاق منه ** وينقص ان به كفّا شددت

Macne: waxaa uu ku siyaadaa in labadiyo bixintiisa (dadka labaro) waxaa uuna ku nuqsaamaa inaad calaacasha ku adkaysato (aadan cid gaadhsiin)

23: Waa arday iska ilaaliya inuu saaxiib xun yeesho saaxiibka xunna dhib ayuu kuu soo jiidaa, waxa uuna kaa mashquuliyaa wanaagga iyo waxbarshada, waxaadna ka barataa akhlaaqda xun oo isaga ayaa macallin kuu noqonaya Nebigu (naxariis iyo nabadgelyo dushiisa ha ahaaatee) waxaa uu yidhi:

(المرء على دين خليله فلينظر أحدكم من يخالل .) رواه ابوداود والترمذي

Macne: qofku wuxuu la diin yahay saaxiibkii ha iska eego qofkiin cidda uu la saaxiibayo.

Ninkii gabyeyna waa kii yidhi:

لا تصحب الكسلان في حالاته.... كم صالح بفساد آخر يفسد

Hala saaxiibin caajislow xaaladihiisa oo dhan, Alla badanaa mid wanaagsan oo fasaadka mid kale ku fasahaaday.

Ogow haddaad wanaag santahay laakiin aad leedahay saaxiib xun dadku waxay kugu tirinayaan dadka xunxun, xitaa macalinkaaga haddaad arday xun dhinac fadhiisato isku mid ayaad unoqonaysaa.

24: waa arday ku dhaqma cilmiga uu bartay iyo wax kasta oo wanaagsan oo uu maqlo, cilmiga haddii lagu camal fali waayo waa uu guuraa saxaabigii Cali Ibnu Abii Daalib waxa uu yidhi: (هتف العلم بالعمل، فإن أجابه وإلا ارتحل)

Macne: cilmigii ayaa udhawaaqay camalkii haddii uu ajiibo cilmigu waa joogayaa haddi kale waa uu guurayaa.

Qofku haddii uu cilmiga uu barto ku camal fili waayo waxa uu shabbahayaa Yahuudda oo Ilaahay u cadhooday, waxaana uu lamid yahay dameer kutub xanbaarsan sida Ilahayba ku matalay.

XUSUUSIN TILAMAAMAHA ARDAYGA GUULAYSATAY SI KOOBAN.

1: Daacadnimo (Ikhlaas).
2: Waqti kaa faa'daysasho.
3: Macallin ixtiraam.
4: Alle aka cabsi.
5: Macaasi ka fagow.
6: Macallin la saaxiib.
7: Sabir iyo Dulqaad.
8: Wax akhrin.
9: Hansare.
10: Dadaal.
11: Talo qaadasho.
12: Daa'ima waxbarshada.
13: Boosaska hore fadhiista.
14: Firfircoon.
15: Bulsho ixtiraam.
16: Nadaafad badi.
17: Jarjaris la'aan.
18: Ducaysi.
19: Waalidka baari u ah.
20: Cilmiga aan uga tagin xishood iyo kibir.
21: Xifdiya cilmiga.
22: Faafiya cilmiga.

23: Ka fogaada saaxiibka xun.
24: Ku camal fala cilmiga.

GUNAANAD

Alle ayaa mahad oo dhan iska leh, nimcadiisa ayay ku dhamaystirmaan waxyaalaha wanaagasan oo dhami, waxaan umahad celinayaa webebka faafiyey qayb kamid ah qoraalkan gaar ahaan webka (www.kalshaale.com) (www.somalitimes.com) iyo cid kasta oo iigu kaalmaysay dhamaystirka buuggan gaar ahaan Eng: cabdilaahi cabdicasiis ismaciil oo akhriyey buuggan meelana talooyin iga siiyey.

Waxaan kale oo umahadcelinayaa cid kasta oo akhrisan doonta ama ka qayb qaadan doonta gaadhsiin bulshada buuggan.

Dardaarankeenu wuxuu noqonayaa in aan tilmaamahaas dhaqan gelinno, Nin iyo raganimadii inta uu ka awoodo, taas ayaa cilmiga lagu baran karaa heerna lagaga gaadhi karaa.

Allena waxaan waydiisanayaa buuggan inuu ku anfaco walaalaha waxbaranaya iyo dhamaan bulshadaba, anigana xasanaad iyo ajar iga siiyo inta aan noolahay iyo geeridayda ka bacdiba.

وبالله التوفيق وإليه المرجع والمآب

TUSMADA BUUGGA.

1: Mahadnaq…… ..2

2: Hordhac…… 2

3: Ahmiyadda cilmiga iyo Fadligiisa…… 3

4: Tilmaamaha Ardayga guulaystay …… 6

MARAAJICDA BUUGGA.

1: قيمة الزّمن عند العلماء: لأبي غُدة

2: العلم وبناء الأمم: د. راغب السّرجاني

3: العلم وآدبه: لابن سوفى